

BOGGA KOBNIIN SHARCI

SHARCI L. 36, Tr. 30 Abril 1975.
Sharci ku saabsan Afduubidda.

GUDDOONSHAHAA GOLAHA SAREE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY In tahay lagama maarmaan in la soo saaro Sharci
ku saabsan Afduubidda;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Daw-
ladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta,

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aankii Gclaha Sare ee Kacaanka iyo
kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Afduubid

1. Qof kasta oo ku afduuba Waddanka gudihiisa ama dibeddaba qof, dayuurad ama gaadiid kale isagoo doo naya in la siiyo lacag ama xoolo ama uu siyaasad haan uga faa'iideysto taaso ka soo horjeeda maslaxadda guud ee Qaranka Soomaaliyeed, nabadgeleyada iyo siyaasadda Kacaanka Soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabyaa dil.

2. Dadka kale ee ku lug leh dembigaas abaabulkiiisa ayagana wa-
xaa lagu ciqaabyaa sida lagu sheegay qayta 1aad ee qodcbkaan.

Qodobka 2aad

Ka reebid

Dhaqan gelid

Haddii dembigaas uusan ka soo horjeedin danaba guud, xurriyadda, midnimada iyo siyaasadda guud ee Qaranka, Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayasha Dawladda ayaa go'aan ka gaadhi doona wixii laga yeeli labaa dadkii galay dembigaas.

Qodobka 3aad

Demb i qarin

Qof kasta oo ka war hela abaabulka dembiga lagu sheegay qodobka 1aad oo aan soo ogeysiin Ciidamada Nabadgeliyada ee ku shuqul leh, waa xaa lagu ciqaabayaa xarig 20 sano ilaa 30 sano, wixii hanti ah ee u lee-yahayna Dawladda la wareegeysa.

Qodobka 4aad

Demb i dhaafid

Qof kasta oo ka qayb gala abaabulka dembigaas haddii uu soo sheego intii uusan dambigu dhicin, wax dembi ah ee lagu qaadayo ma jiro.

Qodobka 5aad

La wareegid

Wax allaale wixii ey weydiisteen oo ey heleen dadka galay dembiga lagu caddeeyey qodobka 1aad wixii hanti ah oo ey ku leeyihii Waddanka gudiiisa ama dibeddaba waxaa la wareegeya Dawladda Soomaliyeed.

Qodobka 6aad

Awood

Maxkamadda Badbaadada Ummadda ayaa awood u leh inay qaado dembiga lagu caddeeyey Sharcigaan.

Qodobka 7aad

Qaadista dacwadda

Qofka ku xadgudba Sharciga waxaa dacwad lagu qaadi karaa isagoo maqan.

Qodobka 8aad

Tirtir

Waxaa la tirtiray qodobka 486 ee Xeerka Ciqaabta.

Qodobka 9aad

Dhaqan gelid

Sharcigaan si degdeg ah buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 30 Abril 1975.

MADAXWEYNNA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Jaalie S. Gaas Maxamed Siyaad Barre